



Ka yarey faafitaanka cudurka ee goobaha lagu yeelanayo kulamada gaarka ah

Meelahaas waxaa sida uu qabyo xeerka ku meel gaarka ah ee covid-19 waajib ku ah in ay ka hortagaan faafitaanka cudurka iyagoo hawlaha u wadaya si keeneysa in ciriiri laga fogaado iyo in dadku ay isu jirsan karaan masafo aamin ah marka laga eego dhanka ka hortagga cudurrada la is qaadsiiyo.

Tani waxay khuseysaa adigaaga mehered xirfadeed awgeed u adeegsanaya ama toos ama si aan toos ahayn u cid kale u siinaya maqsin, aag ama meel dhismo gudeheed ah si loogu qabsado xaflad ama wax la mid ah oo gaar ahaan laysugu imaanayo.

Adigaaga adeegsanaya ama cid kale siinaya maqsin, aag ama meel gaar ahaan leesugu yimaado waa in:

- Aad tirada ka qeybgalayaasha ku sintaa ugu badnaan 8 ka qeybgale.

Maxay yihiin maqsinada ay taasi khuseyso?

Guryaha, aagagga iyo bannaannada soo gelaya guryaha xafladaha ee ganacsi ahaan loo kireeyo waxaa tusaale u ah maqsinada wadaagga ah ee shirkadaha guryaha kireeya, maqsinada jaaliyadaha, maqsinada ay jaamacadaha iyo golayaasha ardaydu leeyihiin iyo basaska iyo doomaha loo kireeyo xafladeyn awgood.

Informationsblad om privata sammankomster på somaliska. Publicerat 2021-03-25.

Maxay ka dhigantahay mehered xirfadeed awgeed?

Mehered xirfadeed awgeed waa mehered ay gacanta ku hayso shirkad saamiley ah, shirkad ganacsi, shirkad qof ahaaneed, urur dhaqaale, urur aan faa'iido doon ahayn, urur samafal ama urur diimeed.

Mehered xirfadeed waxaa la wadi karaa iyadoo faa'iido laga doonayo iyo iyadoo aan laga dooneyn intaba. Xitaa shaqooyinka degmada iyo dowladda waa loo tirin karaa in ay yihiin mehered xirfadeed. Laakiinse taas sooma geleyso kireynta mehered gaar loo leeyahay, tusaale ahaan haddii uu qofi hoygiisa deymiyo qof ay is garanayaan.

Muxuu ka dhiganyahay kulan gaar ah?

Kulan gaar ah waa kulan ay ula jeeddada ugu weyni tahay waqti isla qaadasho bulshanimu. Waxay taasi tusaale ahaan khuseyn kartaa xaflado ay ugu wacanyihiin munaasabado muhiim ah sida xafladaha ardayda, xafladaha dhalashada, xafladaha arooska, munaasabadaha janaasadda- iyo meyd aasidda. Xitaa cashooyinku waxay tusaale u yihiin kulamada gaarka ah. Laakiinse xafladaha looma arko kulan gaar ah, sida tusaale ahaan xafladaha waqlalka-, meherka- iyo meyd duugidda.

Waxaa macluumaadkan la faafiyay 2021-03-25. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad si joogto ah ula socotid xeerarka markaas taagan. Tani warbixin gaaban oo ku aaddan waxa uu xeerka covid-19 ee ku meel gaarka ahi uga dhiganyahay meheredlayaasha kireynta iyo bixinta maqsinada. Fiiro gaar ah u lahaw in sharciyadi, xeerarki iyo qaraarradi horay loo gaaray iyo talooyinki guud ee lagu yareynayay faafitaanka cudurku ay sii shaqeynayaan.

Si aad u aragtid sharciga oo dhammeystiran iyo qoraalka qaraarka waxaa lagu tilmaamayaa [riksdagen.se](https://www.riksdagen.se). Si aad u aragtid xeerka oo dhammeystiran, talooyin guud iyo macluumaad guud waxaa lagu tilmaamayaa [folkhalsomyndigheten.se](https://www.folkhalsomyndigheten.se). Macluumaadka xukuumadda ee ku aaddan covid-19 waxaad ka heleysaa [1177.se](https://www.1177.se). Macluumaadka xiriirka ee Guddiga gobalka iyo macluumaad markaas taagan oo ku aaddan ka warhaynta xagga shuruucda covid-19 waxaad ka heleysaa [lansstyrelsen.se](https://www.lansstyrelsen.se).